

The Shadow Project

Wadista sinnaanta ardayda leh caqabadaha dhanka waxbarashada

Waa maxay The Shadow Project?

Oo sanadkii 2003 ay aasaaseen waalidka dhalay arday leh caqabado dhanka waxbarashada ah, The Shadow Project wuxuu iskaashi la yeeshay dugsiyada si loo kordhiyo fursadaha waxbarasho ee loogu talagalay 1 meelood 5-tii carruurta ah ee qaba caqabadaha dhanka waxbarashada iyo wax u fiirsashada. Adeegsiga barnaamijyadeena, ardaydu waxay yeeshaan caaddooyin tacliimeed oo adag, waxay heersare ka gaaraan xirfadaha bulsho iyo dareen ee muhiimka u ah guul waxbarasho iyo nololeed, iyo in ay helaan ilaa labo sano oo ah awoodooda wax akhris.



Saddex barnaamij oo ardayda ka caawiya inay guul gaaraan

Iskala talinta Wax akhriska

Barnaamijkani wuxuu buuxiyaa farqi muhiim ah oo loogu talagalay akhristayaasha wax akhrisku ku adag yahay iyada oo la isku keenayo 1) tiknoolajiyada la adeegsado oo si gaar ah la iskugu habeeyay, iyo 2) la taliyayaal tabaruc ah oo tababaran oo dhiirigeliya ardayda si ay u dejiyaan hadafyo wax akhris una dhiirigeliyaan horumarka ay sameynayaan. Natiijooyinka: Boqolkiiba 71 % ardaydu waxay helaan 1 ilaa 2 sano oo ah awood wax akhris.

Dejinta Hadaf

Waxaa ku qalabeeyaa macallimiinta waxbarashada gaarka ah manhaj iyo ilo awood leh oo ardayda ka dhiga in ay maamulaan waxbarashooda gaarka ah. Marka ardaydu ka shaqeeyaan hadafyo hami leh, waxay dhisaan kalsooni, dhiirigelin, iyo dulqaad - caaddooyin wanaagsan oo socon doona inta la nool yahay.

Meelaha Dhaqdhaqaaqa Dareenka ee Sare

Oo dhisa xirfadaha carruurta ee ah in ay deganaansho muujiyaan oo diiradda saaraan fasalka iyada la adeegsanayo biririfta dhaqdhaqaaqa joogtada ah. Oo ay taageeraan shaqaalaha dugsiyada oo tababaran, ardaydu waxay aqoonsadaan oo maareeyaan dareenka, oo ah aasaaska dhismaha caafimaadka maskaxda oo wanaagsan. Natiijooyinka: Boqolkiiba 73 % ardaydu waxay kordhiyaan nidaaminta naftooda, oo ah xirfad muhiim u ah guul waxbarasho iyo nololeed.

CHANGING LIVES FOR CHILDREN
WITH LEARNING CHALLENGES

The
**Shadow
Project**

2154 NE Broadway Portland, OR 97232
www.shadow-project.org

The Shadow Project

Dib u xoojinta Jacaylka Waxbarasho Warbixinta Saameynta 2021-22

Mahada waxaa iska leh deeqsinimada taageerayaashayada, inka badan 1,800 ardayda Oregon K-8 ee qabta caqabadaha dhanka waxbarashada ayaa helay taageeradii ay u baahnaayeen si ay ugu horumaraan dugsiga dhexdiisa. Inkasta oo ay jiraan caqabadaha socda ee cudurka baahsan, ardayda ka tirsan The Shadow Project ayaa ogaaday farxadda wax akhrisku leeyahay, xirfadaha la bartay si wax looga qabto walaaca, oo riyo weyn u yeeshaan mustaqbalkooda. **Bal yara fiiri.**

100%

oo ka mid ah macallimiinta ayaa sheegay in barnaamijka Dejinta Hadafku uu ardayda ka caawiyay in ay dib ugu soo noqdaan waxbarashada shakhsi ahaaneed

86%

oo ka mid ah macallimiinta ayaa sheegay in barnaamijka Dejinta Hadafku uu abuuray fasal jawaab ka bixinaya baahiyaha ardayda BIPOC

66%

oo ka mid ah ardayda ayaa kordhiyay awoodooda ay ugu adkeysanayaan dhibaata

Ardaydaydu waxay la kulmeen caqabado badan sanadkani, ka soo laabashada sanad aysan jirin waxbarashada shakhsi ahaaneed. The Shadow Project ayaa ardayda siiyay wax ay qabsadaan.

Rivkah Ross, Macallinka SpED ee Dugsiyada Dadweynaha Oregon

The Shadow Project wuxuu iga caawiyay in aan dhiirigeliyo ardayda lumisay jacaylkii ay u qabeen waxbarashada iyada oo sababtu tahay dugsiga dhanka internet-ka intii lagu jiray COVID-19.

Macallinka SpED ee Oregon



"Wax yar baan hore u akhri jiray, laakiin wax badan baan akhriyaa hadda."

Arday fasalka 4-aad ah "Liana" waxay jeclayd in ay wax akhrido, laakiin way ku adkayd iyada oo sababtu ahayd caqabadeega dhanka waxbarashada. Carqalada qoyska iyo waqti lagu soo bixiyay daryeelka ilmo korsiga dhexdiisa ayaa sii adkeeyay waxbarashadii. Laakiin kaliya laba toddobaad ka dib Iskala talinta Wax akhriska waxay gashay 11 saacadood oo wax akhris ah. "Liana" waxaa dhawaan qaatay qoys ku nool gobol kale, iyaga oo qaatay iyada oo leh kalsooni korodhay wax akhris ahaan.

Boqolkiiba 49% oo ka mid ah ardayda Iskala talinta Wax akhriska ayaa wax akhriya ugu yaraan 20 daqiiqo/maalintii, kaasi oo tilmaan weyn u ah korodhka wax akhriska